Dugsiyadda Guud ee Portland
S & J KU JEEDA GUDUBKA ARDAYDA EE MARSHALL

February 22, 2011

SU'AALAHA XIDHITAANKA DUGSIGA

Q: **Maxaa ku dhacay sadexda dugsi ee Xarunta Marshall?**
A: BizTech, Pauling and Renaissance Arts waa la xidhayaa dabayaaqadda sanad dugsiyeedkan: June 2011.

Q: **Maxay degmadu uxidhaysaa Marshall?**
A: Waxaa jira sadex sababood: (1)Baahida loo qabo xidhidda dugsiga sababta hoos udhaca is-diiwaangelinta ardayda ee Dugsiyadda Guud ee Portland marka lala eego illaha dhaqaalaha oo kooban; 2)iyadii oo ay naga go'antahay bixinta barnaamijyo tayo leh dhamaan dugsiyadda sare ee bulshadda— oo iyadu dhinaca ku haysa in loo helo arday ku filan dugsi walba; 3)Waxay kale oo tilmaamayaan macluumaadka in waqtiga usocdaalka ardayda Marshall ee dugsiyadda deriska ah uu ka yaryahay sidii ay ahayd in uu noqdo ardayda ku jira qaybaha kale dugsiyadda degmadda.

Q: **Ma jiri doontaa xaflad lagu dib loogu xasuusan doono Marshall?**
A: Haa? Si aad oga qayb qaadato xafladda June, la xidhiidh Katie, kessick@pps.k12.or.us 503-916-3053

MAXAY MUDAN DOONAAN ARDAYDA MARSHALL

Q: Xagee Ardayda cusub, kuwa xiga iyo kuwa dhexe ee sanadkan ee Xarunta Marshall dhigan doonaan sanadka dambe?
A: Dhamaadkii deyrta, Ardayda BizTech waxa lagu qoray in dhigtaan Dugsiga Sare ee Franklin bilowga September 2011, halka ardayda Paulling iyo Renaissance Arts lagu qoray Dugsiga Sare ee Madison. Maamulayaasha, la taliyayaasha iyo maamulkaba waxay go'aan ku gadheen in ay ahayd go'aan wanaagsan in ardayda imika lagu qoro dugsiyadda yaryar iyadii oo aan loo eegayn halka ay ku nool yihiin.

Ardayda aan doonaynin in ay dhigtaan dugsiga cusub ee lagu qoray (Franklin ama Madison) waxay heli karaan in ay galaan bakhtiyaanasiibka khaaska ah ee dugsiyadda kael December. Ardayda sida badan helo dugsiga ay danaynayaan hadii ay yihiin fasaladda sannad labaad ee ku nool meel 5mayl u jirta dugsiga lagu qoray ama ay ku xidhiidhaan walaalo.

PPS waxay 70 arday u ogolaatay in ay dhigtaan dugsiyadda ay doonayaan (Madison ama Franklin) halka 46 arday loo diiday codsigoodii. Degmadu waxay ansixisay codsiyadii dhamaan ardayda 1)sanadka dambe gelaya fasalka ugu dambeeya. 2)ama danaynaya in ay dhigataan Madison ama 3) ku jira fasalka 2aad ee Pauling ama Renaissance ee codsaday Franklin iyaga iyo walaalahood ama xaaladda degaanka . PPS waxa ay ku dartay fursad sugayaal dhamaan inta kale ee fasaladda 9aad iyo 10aad.

Q. Ka waran hadii lagu qoray Franklin hasayeeshee aan danaynayo in aan dhigto Madison?
A: Usheeg maamulahaaga ama la taliyahaaga . PPS way ogolaan doontaa codsigaa, kan oo furaya boosas dheeri ah oo laga helo Franklin.

Q. Ka waran hadii la igu qoray Madison hasayeeshee aan danaynayo in aan dhigto Franklin?
A: Imika, boos banaani ma jiro Franklin sanadka soo socda. Hasayeeshee hadii ardayda lagu qoray Franklin ay goostaan in ay dhigtaan Madison, waxaad heli kartaa in aad iksu qorto liiska fursad sugayaasha si aad booskaa banaanaday uqaadato. Si aad hadaba isugu qorto liiskaa la hadal maamulahaaga ama la taliyahaaga. Sidoo kale markii ay degmadu hesho macluumaad dheeri ah oo la xidhiidha saadaalinta diiwaangelinta, waxaa dhici karta in ay soo baxdo cadilaan dheeri ah oo la xidhiidha diiwaangelinta.

Q: Waxaan maqlay in ardayda qaar ay tegi karaan Cleveland halka aysan kuwa kale awoodin taa?
A: Dariiqadda keliya ee ay Ardayda imika ee Xarunta Marshall loogu ogolaan karo in ay ubedeshaan Cleveland waa hadii ay jirto arin adag taa oo ka dhigaysa in ay lagama maarmaan tahay in uu ardaygaa tago Cleveland. Ardayda imika ee Dugsiga Hoose ee Whitman ee fasalka sideedaad xuduuda xaadiridoodu waa Cleveland.

Q: Waxaan maqlay in ardayda garaadka wanaagsan ee BizTech oo keliya ay dooran karaan dugsiga ay tegayaan. Dhibcigu miyeey qayb ka yihiin nidaamka doorashadda dugsiga.
A: Maya dhibcuhu wax dowr ah kuma lahan nidaamka doorashadda dugsiyadda. Ardayda BizTech waxaa lagu qorayaa Franklin hadii aysan doonaynin in ay dhigtaan Madison, ha usheegaan la taliyahooda degmaduna way tixgelin doontaa codsigaa. Sidoo kale ardaydu waxay leeyihiin fursad ay ku galaan bakhtiyaanasiibka degmadda oo ku eg bisha Feb. 28. Ardayda gala Bakhtiyaanasiibkan waxay leeyihiin fursad wanaagsan oo ay ku heli karaan Dugsiga Sare ee Jefferson - Middle College for Advanced Studies, Dugsiga Sare ee Roosevelt ama the Harriet Tubman Leadership Academy for Young Women. Fasaladda 9aad waxay kale oo codsan karaan in ay dhigtaan Benson.

Q. Ma ka qayb geli karaa bakhtiyaanasiibka degmadda oo dhan?
A: Haa, Ardayda Marshall waxay codsan karaa iyagii oo sii maraya annual PPS transfer cycle barnaamijyadda "gaadjka ah" ee Dugsiga Sare ee Benson Polytechnic, Dugsiga sare ee Jefferson - Middle College for Advanced Studies, Harriet Tubman Leadership Academy ama Dugsiyadda Sare ee kale ee PPS. Qaybta bedelka waxay ku egtahay Feb 28. Boos hayntu wa ay xadidantahay. Marka lagu daro, waxaa jira dugsiyadda caqdiga kula jira degmadda iyo ikhtiyaaraadka waxbarasho ee kale. Waxaad macluumaad dheeri ah ka ogaan kartaa maamulahaaga ama la taliyahaaga, ama booqo shabkadda www.readysetconnect.pps.k12.or.us

Q: Waxaan kasoo bedelanayaa degmo kale. Ma sii wadan karaa dhigashadda dugsiyadda PPS?
A: Hadii aad tahay arday arday aan ka tirsanayn degmadda, cusboonaysiintaadda waxaa dib loo eegayaa sanad walba PPS iyo degmadda aad ku nooshahay. Dib u cosboonaysiintu waxay ku xidhantahay gudashadda akadeemiyadda, dabciga iyo xaadiridda. Waxaad sidoo kale u baahantahay in aad codsato dugsi cusub oo PPS adigii oo ka dhigan arday dibadda ka imanaya.

Q. Maxaan samaynayaa hadii aan doonayo in aan xili hore qalinjebiyo?
A: Ardayda tubtii uu xili hore ku qalinjebin lahaa haya (sida kan sanadda sadexaad ama gabagabadda) waxa uu qaadan karaa fasaladda gelinka dambe si uu saacado dheeri ah uhelo – iyadii oo bilaash ah – waxaa bixiya Barnaamijka Ardayda Gelinka Dambe ee Portland oo ka baxa Benson. La hadal la taliyahaaga si aad wax badan oga ogaato.

Q: Ma dhigan karaa dugsiyadda degmo kale?
A: Sida guud waad dhigan kartaa dugsi degmo kale ka tirsan oo keliya "xaalad aan caadi ahayn" la xidhiidh Xarunta Bedelak iyo Diiwaangelinta si aad uhesho macluumaad dheeri ah 503-916-3205 or enrollment-office@pps.k12.or.us.

SANADKA XIGGA

Q: Sidee ku tagayaa dugsigayga cusub?
A: PPS waxay qorshaynaysaa in ay sii joogtayso bixinta tigidhadda basaska lagu raaco ee ay siiso dhamaan ardayda dugsiyadda inta lagu jiro sanad dugsiyeedka.

Q: Macalimiintayadu ma waxay tegi doonaan dugsiga cusub?
A: Qaar ka mid ah macalimiinta – walow aysan kuligood ahayn- waxay u badantahay in ay tagaan dugsiga lagugu qoray. Si loo faahfaahiyo: marka la ogaado imisa arday ayaa tegaya Madison iyo Franklin, waxaynu awoodi karnaa in la tilmaamo imisa macalimiin ayaa looga baahanyahay dugsiyadaa. Macalimiinta loo baahdo waxaa lagu salayn doonaa sidii ay shaqadda ugu soo kala horeeyeen – tan oo ka dhigan imisa sanadood ayeey soo shaqaynayeen khibrad noocee ah ayeeysa u haystaan Dugsiyadda Guud ee Portland. Inkasta oo ay sanado badan haystaan waa in ay – sida ay u badantahay – loo qaataa boosaskaa ay raadinayaan. Macalimiintu waxay ogaan doonaan taa dhamaadka sanad dugsiyeedkan iyadii oo laguu soo gudbin doono macluumaadkaa.

Q: Saacadihii aan kasoo qaatay Marshall ma la ii xisaabayaa dugsigayga cusub?
A: Dhamaan saacadaha aad ku qaadatay Marshall waxaa laguugu xawilayaa dugsiga cusub. La taliyayaasha Marshall ayaa kala shaqayn doona sanadkan la taliyahaaga cusub warqadaada dhibcaha iyo macluumaad kale oo muhim ah.

Q: Muxuu yahay ikhtiyaarka dib-u-soo celinta khiyaaraadka dugsiyadda kale?
A: Madison iyo Franklin waxay labaduba leeyihiin fursado gelinka dambe ah oo ay wax ku baranayaan shabakadda iyadii oo la adeegsanayo PLATO. Waxaa jira fursado kale oo ay oga qayb qaadan karaan Barnaamijka Ardayda Gelinka Dambe ee Portland ee dugsiga Benson.

Q. Xidhida dugsigu ma saamayn doontaa awoodayda in aan dhigto kuliyadaha?
A:. Ubedelashadda dugsi cusub ma saamayn doonto fursadaha laguugu aqbali karo kuliyadaha?

Q. Sidee bay ardaydu ku helayaan waraaqaha lagu caawinayo dugsiga iyo shaqadda tan oo ay bixnayaan macalimiinta Marshall?
A: Waxaan ku talinaynaa in ay ardaydu waydiistaan macalimiinta waraaqahaa lagu caawinyo waxbarashadooda iyo shaqadda sanad dugsiyeedkan.

Q. Ma jiro doonaan xarun caafimaad Franklin iyo Madison?
A. Haa. Waxaa hadaba jira Xarun caafimaad oo dugsiga sare ee Madison, waxaa kale oo jira heshiis aan la galnay Qaybta Multnomah sidii looga furi lahaa xarun caafimaaf dugsiga sare ee Franklin deyrtan.

Q: Waxaan danaynayaa in aan noqdo hogaamiyaha ardayda ama kooxda dugsigayga cusub. Hadii ay qaadanayan jiilaalka sanadka xiga, sidee baan fursad ugu heli karaa in aan u tartamo ama aan isku dayo?
A: Howlwadeenadda Madison iyo Franklin ayaa kala shaqan doona howlwadeenadda Marshall si ay u hubiyaan in ardayda BizTech, Pauling iyo Renaissance ay helaan fursad loo simanyahay iyaga iyo kuwa dhigta Madison iyo Franklin.

Q: Sidee bay ardaydu oga qayb qaadanayaan ciyaaraha dugsigooda cusub?
A: Madaxa ciyaaraha ee Marshall ayaa siin doona macluumaadka la xidhiidha ciyaaraha labadda todobaad ee soo socota. Dhamaan ardayda Marshall waxay heli doonaan fursadda ka qayb qaadashadda ciyaaraha oo caadaalad lagu xulay. Weli ma ogin ayaa noqon doona tababarayaasha Madison iyo Franklin. In badan oo kuwaa ka mid ah waxay sii ahaan doonaan sidoodaa, walow ay qudheedu suuragal tahay in kooxaha Marshall iyo Madison ay tababarayaashoodii sii haystaan.

OTHER QUESTIONS

Q: Maxaa dhacay Marshall oo uu ugu furnaan waayey ardayda dhamaynaysa sanadka dambe?
A: In uu ufurnaado dhismaha koox arday ah waxa ay u baahantahay hoos udhiga tiraadda maadooyinka . ardaydu ma heli doonaan maadooyinka Ikhtiyaariga ah, howlaha dugsiga ee gelinka dambe ama ikhtiyaaraad kala duwan oo maadooyinka ah, sababtuna waxaa weeye iyadii oo ay howlwadeenadu ku yaryihiin.

Q. Maxaa uu unoqonayaa dugsiga sare ee cusub walaalka iga yar?
A: Waxay ku xidhantahay dugsiyadda hoose ee xaafadda ama dugsiyadda K-8 ee lagu qoray:

- Bridger K-8, Dugsiga Hoose ee Kelly , Lent K-8, Marysville K-8 waxay dhigan doonaan Dugsiga Franklin
- Harrison Park K-8 waxay dhigan doonaan Madison
- Dugsiga Hoose ee Whitman waxay dhigan doonaa Cleveland.

Q: **Maxaa uu mudan doonaa dhismaha Marshall?**
A. PPS waxay la shaqayn doontaa asxaabteeda sidoo loo meel loo saari lahaa ikhtiyaaraadka la gudboon. Hadii ay degmadu dayactirayso dugsiyadda. Waxaa dhici karta in Xarunta Marshall dib loo furo si ku meel gaadh ah ardayda dugsiyadooda la dhisayo.

Q: Waxaan qabaa su'aalo intaa ka badan. Yaa iga caawin kara?
A: La hadal maamulahaaga ama la taliyahaaga.